



Pluttra - Macluumaadka loogu talagalay masuuliyiinta

Dukumiinti xanaanadda iyo qalabka macluumaadka

Pluttra waxaa loo sameeyay xanaanadda waxaana sameeyay Waxbarashada Lin. Pluttra waa hab isticmaaluhu jeclaysto oo loogu talagalay xanaanadda si ay ula wadaagaan dukumintiga iyo macluumaadka masuul ka ah ee guriga jooga. Dukumiintiga wuxuu ka koobnaan karaa qoraal, sawiro, maqal, iyo muuqaal. Maadaama Pluttra aysan ubaahnayn qaab gaar ah, waxaa lagu adeegsan karaan teleefoonada casriga ah, tablet-yada, iyo kumbiyuutarada.

Pluttra waxay awoodaa inay kor u qaado xiriirka ka dhexeeya xanaanadda iyo masuulka ka ah ee guriga jooga. Ka masuul ahaan, waxaad arki kartaa daqiiqado maalinta cunugaaga kujira xanaanadda, sidoo waxaad maqli kartaa codadka macalimiinta ee quseeya shaqada waxbarasho xanaanadda. Waxaad sidoo kale heli doontaa fariimo muhiim ah waxaadna fursad uhelaysaa inaad ku rukunsato kal-tirsiga kooxda.

Waa muhiim in adigoo ah masuul ah aad kalsoon tahay isticmaalka Pluttra. Adiga keliya ayaa heli kartaa dukumiintiyada cunugaaga. Amaanku waa mudnaanta koowad Pluttra dhexdeeda – wax kasta oo xanaanadda lagu daabaaco ayaga iska leh waxaana keliya heli kara shaqaalaha xanaanadda iyo adigoo ah masuulka ah.

Sida loo samaysto koontadaada shaqsiga ah

- Xanaanadda wuxuu iimayl ahaan kuugu soodirayaa martiqaad
- Kudhufo marrinka marti qaadka
- Gali macluumaadkaaga oo samay eray sireed
- Kadibna kudhufo calaamada Pluttra
- Talaabada xigta waa inaad soo dajisid app-ka masuulka ah

Pluttra app

Waxaad kasoo dagsan kartaa app-ka Google Play ee Androidka iyo AppStore loogu talagalay iOS. App-ka waa lacag la'aan. U guda gal adigoo adeegsanaaya eray sireedkii aad samaysay markaad furanaysay koontadaada shaqsiga ah.

Si aad si fiican ugu fahanto Pluttra, waxaan samaynay filimaan oo aad halkaan ka heli karto: https://www.youtube.com/playlist?list=PLYyf2_IH9nwcDzU9oWlseeavVpVOs1vi0

Taagerada Pluttra

Kooxda Taageerada ee Pluttra Waxay ku hadlaan Iswiidhishka iyo Ingiriisiga. Saacadaha shaqada: maalmaha shaqada inta u dhexeysa 08:00 and 17:00
Iimaylka: produktsupport@lineducation.se
Teleefoon: +46 (0)10-209 63 10

Amaanka Pluttra

Bixiyayaasha baahiyaha waa PIN iyo Glesys. Pluttra wala kaydiyaa habeen kasta macluumaadkana waxaa lagu xareeyaa Sweden.

Heshiis ayay wada galeen xanaanadda iyo hay'adda waxbarashada ee Lin kaasoo xaqiijinaaya u hoggaansaminta Sharciga Macluumaadka Shaqsiga ah ee Iswiidhishka. Saxiixinta heshiisyada waxaa sidoo kale la socda heshiis macluumaad samayn ah. Heshiiskan wuxuu xaqiijinayaa in aan macluumaadka shaqsiga u maarayno anagoo raacayna shuruudaha u dagsan maamulka masuulka ka ah.

Galitaanka waxaa difaacay SSL, taasoo la mid ah heerka difaac ee ay isticmaalaan bangiyada iyo ganacsiyada casriga ah si ay usagaan eray sireedyada iyo macluumaadka xasaasiga ah.

Wax kasta oo xanaanadda lagu daabaco Pluttra waxaa keliya heli kara maamulaha xanaanadda iyo macalimiinta. Xanaanadda wuxuu xaq u leeyahay dhammaan wax kasta oo kujira Pluttra, sida qoraal, sawiro, muuqaal, iyo maqal. Dukumiintiga ee caruurta shaqsiga ah waxaa keliya heli kara isticmaalayaasha kuwaasoo ku guda jira kuna xiriirsan kooxda, iyo masuulka cunuga. Tixraacda fudud ee liiska ayaa ufududeeya macalimiinta kooxda si ay ula socdaan caruurtii loo ogolyahay in la sawiro ayadoo ogolaanshaha laga haysto masuulka ah.

Macluumaadka wuxuu kudiyaarsanyahay luuqadaha soosocda: Iswiidhishka, Ingiriisiga, Carabiga, Farsi, Dari, iyo Soomaali. Macluumaad dheeraad ah oo Iswiidhishka ku qoran ayaad ka helaysaa <http://www.lineducation.se/pluttra>